



# San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER  
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

Terry B. Grier, Ed.D.  
Madaxa Waxbarashadda

Juunyo 2008

Mudane Waalidiin ama Dadka ilmaha masuulka ka ah,

Maadaam sannad-dugsiyeed cusub uu mar dhaw si dhakhso ah u bilaabmeyo, waxaan jecelahay inaan idiin ka mahadceliyo taageerada aad ka geysateen inaan carruurtiinna dugsiyada ugu adeegno.

Xaalada miisaaniyadeed ee qallafsan ama adag weli wey socotaa. Waxaa si wadajir ah noogala qeyb qaadateen inaan mudaneyaasha la soo doorto aad u muujiseen saameynta miisaaniyada la jaray ay ku leedahay ardeydeenna, dugsiyadeenna iyo jaaliyadeenna. Taasi waxay sababtey in xoogaa horumar ah aynu sameyno. Waxaan idiin ka mahadcelineynaa dadaalka dheeraadka ah ee aad sameyseen.

Guddoomiyaha dawlad-goboleedku wuxuu soo saarey bishii Maajo 14 keedii Dib-u-habbeynta Miisaaniyada Bisha Maajo. Shaqaalaha waxbarashadda degmadu waxay baadhitaan ku hayeen saameynta ay arrintaasu dugsiyada ku leedahay. Hoos-u-dhaca dhaqaalaha ee waxbarashadda degmada oo ahaa \$80 malyan wuxuu hoos ugu dhacay \$53 malyan. Inkasta oo aan ku amaaneyo in Guddoomiyaha dawlad-goboleedku ahmiyada uu siiyey waxbarashadda, si uu miisaaniyada dugsiyadeenna ugu soo celiyo, hadana miisaaniyadaas uu soo saarey waxay tibaaxaysaa in wax badan waxbarashadda degmada laga dhimay.

Inkastoo aan sii wadeyno dagaalka aan u galayno in dugsiyadeenna miisaaniyada loo soo celiyo, hadana waxaan aaminsanahay inaan bilaabi karo inaan qeyb ka mid ah miisaaniyadii la jaray dib u soo celiyo. Guddiga Waxbarashadda ee Degmada ayaan u gudbin doonaa talooyin ku saabsan sidii aan miisaaniyadaas wax uga soo celin lahayn. Fasalka dhexdiisa ayaan ka bilaabi doonaa.

Muddadii aan ku guda jirey xaalada miisaaniyada ee qallafsan, waxyaabo badan oo wanaagsan ayaa ardeyda iyo dugsiyada ka dhex socday. Sannadkii labaad, ayaa 15 dugsiyada San Diego Unified ka mid ah ay soo galeen liiska Dugsiyada Guud ee Dalka Maraykanka ugu Wanaagsan sida uu soo saarey wargeyska caanka ah ee la yidhaahdo *Newsweek*. Lix dugsiyada hoose ah waxaa loo magacaabey inay yihiin Dugsiyada ugu Wanaagsan California. Sagaal iyo toban macallin ayey Guddiga Qaranka ee Shahaadooyinka Macallimiinta guddoonsiiya siiyeen shahaadooyin. Sannad-dugsiyeedkii 2006-07 waxay dugsiyada San Diego Unified noqotey degmada keliya ee 10 waxbarasho degmo ee dalka Maraykanka ugu weyn ee gaadha Yoolal-Sannadeedkii looga baahnaa inay gaadho. Laba iyo toban dugsi ayaa horumarka waxbarasho ee ay sameeyeen darteed lagu siiyey Abaalmarinta Waxbarasho ee loo yeqaano Title I. Guulahaas oo dhan in la gaadho taageerada aad siiseen carruuta ayaa macquul ka dhigtay.

Sannadka soo socda, guulahaas la gaadhey ayaan halkaas ka sii wadi doonaa. Laga bilaabo xilliga dayrtan, degmo kasta oo dugsi sare waxay yeelan doontaa la-taliye qalinjebinta qaabilsan, waxaa laga heli doonaa ugu yaraan 10 koorsooyinka Meeleynta Sare ah (AP). Afar dugsi oo cusub oo ah kuwa farsamada casriga ah lagu baranayo ayaa la furi doonaa: Dugsiyada Hoose ee Sherman iyo Mary Lanyon Fay, Memorial Preparatory for Scholars iyo Athletes, iyo Millennial Tech Middle magnet school. Barnaamijyo dheeraad ah ayaa lagu dari doonaa, si dhammaan ardeyda loo siiyo waxbarasho tayo sare leh.

Mar kale waad ku mahadsan tihiin inaad nagu aamintaan waxbarashadda ilmihiiinna. Fasax xagaa ah oo wanaagsan ayaan idiin rajeynaynaa!

Si daacadnimo ah,

Terry B. Grier, Ed.D.  
Madaxa Waxbarashadda

F.G – Si aad u heshaan warbixinada ugu dambeeya ee degmada iyo waxbarashadda guud, fadlan waxaad soo dalbataan *Cusbooneysiinta Akhbaaraha ee Toddobaad kasta (Weekly Update)*, oo Jimce kasta la soo daabici doono. Waxaad si dakhso ah uga heli kartaa qeybta [www.sandi.net](http://www.sandi.net).

**Somali version: Letter to Parents - June 2008**